



# SOLJA

## SOMALILAND JOURNALISTS ASSOCIATION

Behind Ex-UNICEF Office, Shacab Area Tel: +25263-4194200/+2522572604

E-mail: [soljajour@gmail.com](mailto:soljajour@gmail.com) / [solja.ed@soljaorg.com](mailto:solja.ed@soljaorg.com) Website: <http://www.soljaorg.com> Hargeisa, Somaliland

Ref: SOLJA/H/ -2020

Date: 24/08/2020

### War-saxaafadeed:-

Ururka Suxufiyiinta Somaliland (SOLJA) waxa uu si adag uga soo horjeedaa xadhiga labada wariye ee kala ah Liibaan Cismaan Cali iyo C/qaadir C/Raxman Habane oo ka kala tirsan telefishanka Eryal iyo mareegta Wajaalnews, kuwaasoo ku xidhan xarunta danbi baadhista ee C.I.D-da.

Ururka SOLJA, waxa uu u arkaa xadhiga labada wariye kuwo ka baxsan xeerka Saxaafadda maadaama oo la xidhay iyadoon Dacwadooda la dhagaysan, iskana difaacin eedaha loo haysto, kuwaas oo ay ahayd intaan la xidhin in lagu soo oogo.

Ururka SOLJA, waxa uu soo dhawaynayaa Dacwada Mulkiilaha Telefishanka Astaan C/manaan Yuusuf, kaasoo ay dacwadiisii maanta ka bilaabantay Maxkamadda Gobolka Maroodi-jeex, iyadoo in badan ururku ku baaqayey in sharciga la horkeeno, maadaama xadhigiisa ay ku gedaanaayeen mugdiyo farabadan.

SOLJA, waxay walaac badan ka muujinaysaa qaabka uu wasiirka Wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigalintu ula dhaqmayo Suxufiyiinta Dawladda, Hay'addaha warbaahinta ee madaxa banaan iyo horumarkii saxaafadda Somaliland oo uu wiiqayo.

Ururka SOLJA, waxa wariyayaasha ka hawl gala wasaaradda Warfaafinta ka soo gaadhaya tacayadiyo farabadan oo ay ka mid yihiin in aan la siinin gunnooyin ay ku shaqaynayeen oo wasaaradda heshiisyo kula gashay wasaaraddo kale, Hay'addo madax banaan iyo shirkaddo ganacsi, kuwaas oo marka lacagahooda la soo qaado aan la siin ama la leexsado.

Marka ay isku dayaan inay kala xisaabtamaan masuuliyiinta wasaaradda-na loogu hanjabo in shaqada laga eryi doono, iyadoo lacagahaas ay xaqa u leeyihiin ee wasaaradda soo gala aanay meel na kaga dhicin qasnadda dawladda ama aanay marin nidaamka xisaabeed ee maaliyadda halka xafiis loogu talo galay dakhliga wasaaradda soo gala uu ka dhex furan yahay xarunta Wasaaradda.

Ururka SOLJA, waxa uu u arkaa heshiisyada ay wasaaradda Warfaafintu la gasho hay'addaha iyo shirkaddaha madaxa banaan ee aan sharciga waafaqsanayn in ay wiiqeen dakhligii ay ku tiirsanaayeen warbaahinta madax banaan, maadaama wasaaradda oo Miisaaniyadda qaranka ka hesha in ka badan Afar Milyan ay tartan dhinaca suuqa ah kula jirto warbaahinta gaarka loo leeyahay, taasoo sababtay inay albaabadu u xidhmeen warbaahin farabadan.

Warbixinada dhiilada leh ee ku habsatay wariyayaasha warbaahinta Dawladda u shaqaysa iyo kuwa warbaahinta gaarka loo leeyahay ba ee hortaagan ururka SOLJA iyo guud ahaan Qaranka Somaliland ba waa talaabada uu Wasiirka Wasaaradda Warfaafintu ku joojiyay horumarkii suxufiyiinta ee dhinaca Aqoonta oo uu dhamaantood ka jaray, isagoo gooyay dhaqaalihii Qaranku ugu talo galay. Gaar ahaana wuxuu ka joojiyey boqol suxufi oo wax ka barta Kuliyadda Saxaafadda ee Jaamacadda Hargeysa iyo Jaamacaddaha kale ee gaarka loo leeyahay.

Ururka waxa uu u arkaa Wariyayaasha u shaqeeya warbaahinta Dawladda oo ah kuwa ugu badan ee uu ururku matalo inay ku sugan yihiin xaalad car juuq dheh, taasoo uu wasiirku kusoo kordhiyey wasaaradda isagoo u adeegsada cago juglayn iyo hanjabaad gaadhsiisan in uu ula dhaqmo nidaam ka baxsan shuruucda shaqaale nimo, isagoo u adeegsada go'aamo sharci daro ah sida dhacday mudadii uu wasaaradda joogay oo uu kolka uu doonana eryo markuu doonana soo celiyo inta uu doono, mushaharooyinkoodii iyo gunnooyinkoodiina kaga haysto awood sharci daro ah.

Ururka SOLJA, waxa uu walaac wayn ka qabaa in isla xisaabtankii iyo ku dhaqanka sharciga ka la'yahay wasaaradda warfaafinta oo la moodo inaanu qaban xeerka Saxaafadda iyo xeerarka kala duwan ee qarankan ka dhigay kuwo isla xisaabtama gaar ahaan inaanu wasiirku u hogaansamin awoodoo sharci dajinta oo uu gabi ahaanteed ba iska dhigo tiray in uu ku dhaqmo xeerarkii ay Ansixiyeen sida xeerka lagu dhaqan galiyey Miisaaniyad sanadeedka 2020-ka.

Ururku waxa uu hore mawqif cad uga istaagay go'aankii sharci darada ahaa ee lagu xidhay Star iyo Universal, kuwaas oo uu wali ururka aaminsan yahay in ganaaxii la saaray uu ahaa sharci daro, maadaama aanay wasaaradda iyo Wasiirka mid koodna xaq u lahayn in ay kala noqdaan, Xayiraan ama ganaaxaan wariye ama Hay'ad warbaahineed.

Ururka SOLJA, isagoo ka duulaya u adeegsiga Suxufiyiinta iyo hay'addaha warbaahinta Xeerka Ciqaabta waxa uu toddobaadkan Maxkamadda sare ee Somaliland u gudbiyey Dacwad ka dhan ah tacadiyadda ciqaabeed ee ay xukuumaddu kula kacdo Warbaahinta Somaliland, waxaanu ka rajaynayaa Maxkamadda Sare inay tixgaliso Dacwadaas, maadaama dood muddo dheer qaadatay ay ka taagan tahay qaabka loo maro Dacwaddaha Saxaafadda.

Sidaasi daraadeed,; Ururka SOLJA, isagoo ka duulaya dhibaatooyinka kala duwan ee kor ku xusan waxa uu ku baaqayaa qoddobadan:-

1. In hay'addaha kala duwan ee Hanti-dhawrka, Golaha Wakiiladda, Hay'adda Shaqaalaha Dawladda iyo Madaxweynaha Qaranku wax ka qabtaan dhibaata wasiirka Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigalintu ku hayo shaqaalaha iyo hay'addaha warbaahinta
2. Inay hay'addaha Garsoorku joojiyaan inay si fududu isaga xidhaan Mulkiilayaasha iyo hay'addaha Warbaahinta, iyagoon ka garniqin Dacwadahooda ama aanay ku taageerin masuuliyiinta Dawladda ku tagrifalka awodeed ee ka baxsan inta shuruucda dalku u ogoshahay
3. In Golaha Wakiiladdu guda galo Wax ka bedelka iyo kaabista Xeerka Saxaafadda ee sanadkii 18aad horyaala golaha Wakiiladda
4. In guddida Dabagalka Hantidu baadhis madax banaan ku samayso isticmaalka Miisaaniyadda iyo Dakhliyadda kala duwan ee soo gala wasaaradda Warfaafinta, Dhaqanka iyo Wacyigalinta, gaar ahaan Madaxa libka Barnaamijyadda ee wasaaradda oo hore u galaftay wasiirka imikana cabasho badan ay Suxufiyiinta u shaqeeya wasaaraddu ka muujiyeen
5. In Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland talaabo cad ka qaato dibu-dhaca ka jira wasaaradda isla markaana dar dar galiyo adeegyadda kala duwan ee ay bulshada u hayso oo ah kuwo haddii muruq iyo maan la galiyo lagula tartami kari lahaa warbaahinaha kala duwan ee loo isticmaalo dagaalka ka dhanka ah Somaliland

Maxamuud Cabdi Jaamac

Gudoomiyaha Ururka Suxufiyiinta Soomaaliland ee SOLJA

